

# **JAMHURIYADDA SOMALILAND**

**QABYO-QORAALKA XEERKA HORUMARINTA  
WADDOOYINKA**

**XEER Lr. ....2013**

## **Golaha Wasiirradu;**

- Markuu Arkay;** In Waddooyinku ka mid yihiin hal-bawlaha isku xidha Dalka, isu-gudubka Bulshada, sugidda amaanka iyo kor-u-qaadida dhaqaalaha.
- Markuu Arkay;** In Dhaqaalaha waddooyinka ka soo gala **Fuel Levy-ga iyo Lessen Levy-ga** iyo dhibaatooyinka Waddooyinku aanay ahayn wax is-kafayn kara, isla markaana aanay jirin wax dhaqaale ah oo inaga soo galay qaadhaan-bixiyayaasha laga soo bilaabo sanadkii 2006.
- Markuu Dersay;** Dhibaatooyinka ay Shilalka Gaadiidku keenaan waddo xumadda awgeed ee dhimashada Dadka, Xoolaha iyo khasaaraha dhismayaasha iyo hantida kale ee kala duwan.

**Waxa uu ansixiyey Qabyo-qoraalka Xeerka Horumarinta Waddooyinka.**

## **Qodobka 1<sup>aad</sup> Eray Bixin**

Hadaan xeerka gudihiiisa si kale loogu xusin ama loogu sheegin waxaa looga jeeda erayadan soo socda:

**Wajibaad Maaliyadeed:** waxaa looga jeeda takaaliifta xeerkani jideeyey.

**Xoolaha Damaanka ah:** Waxaa looga jeedaa xoolaha Ganacsi ahaan looga dhoofinayo Dekedaha Somaliland.

**Gaadiid:** Waxaa looga jeeda gaadiidka xeerkana lagu xusay.

**Tan:** waa halbeeg qiyaseed culays oo u dhigma **1000Kg**

**Tax:** kalmada TAX (**Cashuur**) ee xeerka **The Body of Laws on Direct Taxation** waxaa loo fasiraya kalmada Tax waajibaadka Maaliyadeed ee xeerka.

## **Qodobka 2aad Magaca Xeerka**

Xeerkana waxaa loogu yeedhayaa **Xeerka Horumarinta Waddooyinka.**

## **Qodobka 3aad Ujeedada Xeerka**

Ujeedada xeerku waa in la meel mariyo Xeer:

- 1- jideeya dhaqaale lagu horumariyo wadooyinka dalka
- 2- Gacan ka geysta Horumariya Isu gudubka bulshada, Sugidda Amaanka & Koboca dhaqaalaha dalka.

## **Qodobka 4aad Xadka dabaqaada**

Xeerkana waxaa lagu dabaqayaa damaanka iyo gadiidka ku xusan.

## **Qodobka 5aad**

### **Waajibaadka Maaliyadeed ee Xoolaha Damaanka ah.**

Waxaa la waajibiyey in neef kasta oo ka dhoofaya Dekadaha dalka laga bixiyo qadarka lacagta ah ee soo socota:

- 1-** Adhiga: Neefkiiba \$1 USD (Hal Doolar)
- 2-** Lo'da: Neefkiiba \$3 USD (Sadex Doolar)
- 3-** Geela: Neefkiiba \$5 USD (Shan Doolar)

## **Qodobka 6aad**

### **Waajibaadka Maaaliyadeed ee Gadiidka**

Waxaa la waajibiyey in gaadiidka:

- 1- (Gaadhi yar) Cars, Pick-up & Land cruisers, Mini-Bus , Light goods vehicle iyo kuwa qaadkoogu ka yaryahay 3 Tan, **Sadexdii biloodba mar laga qaado \$15.50 USD** oo ah qimaha dhismaha  $1 \text{ m}^2$  oo Wadada ah.
- 2- In gaadiidka qaadkoogu ka badan yahay **3 Tan** oo ah: Medium goods Vehicle , Heavy goods vehicle , Trailers , **Tan-kiiba laga qaado: \$ 5 USD (Shan Doolar)**, **saddexdii bilood hal mar laga qaado.**

## **Qodobka 7aad**

### **Ururinta iyo Fulinta**

Iyada oo aan waxba laga bedalin macnaha kalmada TAX (**Cashuur**) ee xeerka **The Body of Laws on Direct Taxation**. Ururinta Waajibaadka Maaliyadeed ee Xeerkani jideeyey waxaa loo raacayaa: Chapter I & II ee Title iV ee Xeerka **The Body of Laws on Direct Taxation** iyo xeerarka kale ee khuseeya.

## **Qodobka 8aad**

### **Dacwadaha iyo Ciqaabta**

Iyada oo habka dacwad qaadista loo raacayo xeerarka habka meddaniga iyo ciqaabta, ciqaabaha lagu mutaysan karo jabinta xeerka waxaa loo raacayaa ciqaabaha ku xusan, Title III ee **The body of laws on Direct Taxation**. Qof kasta oo jabiya qodobada xeerka

waxaa lagu ciqaabaya, ciqaabaha ku xusan: **Title V**, ee xeerka **The body of laws on Direct Taxation** iyo xeerarka kale ee khuseeya.

**Qodobka 9aad  
Awoodaha Hantidhawrka.**

Ka sakow awoodaha hantidhawraha guud ee ku xusan xeerka hantidhawraha guud, xeer **lambar 05/98** iyo xeerarka kale ee dalka, hantidhawraha guud wuxuu awood u leeyahay; baadhista iyo dabagalka waajibaadka maaliyadeed ee xeerkani jideeyey.

**Qodobka 10aad  
Dhaqan-galka xeerka**

Xeerkani wuxuu dhaqan galaya marka golaha wakiiladu ansixiyo, Madaxweynuhuna saxeexo isla markaana lagu baahiyo faafinta rasmiga ah.